

UNITED NATIONS



NATIONS UNIES

Office of the United Nations Resident & Humanitarian Coordinator for Somalia

War-saxaafeed uu isku-duwaha Xafiiska Qaramada Midoobay (QM) ee Soomaaliya u qaabislan hawlgallada Bini'aadminnimadu ka soo saaray Dhacdadii duleedka Marka

(Nairobi, 7 October 2008) Xalay oo bisha Oktoober ay ahayd 6, qiyaastii 6dii saac ee habeennimo, waxa qarax lala haleelay gaari u kiraysnaa QM oo ku socdaalayey wadada isku xirta garoonka Marka ilaa magaalada Marka. Waxaana qaraxaasi ku dhintay darawalkii gaarigaas, iyadoo labo kale oo shaqaalaha QM ahaa oo gaarigaas la socday, una kala dhashay Talyaaniga iyo Muwaadin Soomali ahaa uu dhaawac fudud ka soo gaadhay. Waxaana lagu daweyey Cisbitaal degmada, iyadoo loo soo qaadi doono magaalada Nairobi waqtiga ugu dhaqsiyaha badan ee suuragalka ah.

Wuxuuna qaraxaasi ka dhacay masaafad gaaraysa ilaa 4 kilometres ee duleedka Marka. Welina waa goor hore oo deg-deg ah in la xaqiijiyo sababta dhabta ah ee qaraxaas ka dambaysay. Inta laga helayo baaritaan buuxa oo arrintaas waafaqsan, waxay QM si ku-meel-gaar ah uga soo saari doontaa shaqqaalaheeda Marka.

“Waxay imminka Qaramada midoobay mudnaanta koowaad siin doontaa arrimaha nabadgalyada iyo ammaanka shaqaalaha gudaha ku sugan, annagoo si weyn ugu boogaadinayna maamulka deegaanka, dadaalkooda dhinaca gurmada xayiga ah ee ay muujiyeen markii weerarkaasi dhacay,” sidaas waxaa yiri; Mr. Graham Farmer, sii hayaha isku-duwaha xafiiska hawlgalka bini'aadminnimada QM. “maka ay noo caddaato sababta dhabta ah ee weerarkaasi u dhacay, ayaa markaas wixii ka dambeeya diiradda saari doonaa sidii an uga hortagi lahayn wax kasta oo carqaladayn kara hawlgalka lagu badbaadinayo nolosha dadka.”

War-saxaafadeed kale oo dheeraad ah, ayaa la soo saari doonaa markasta oo xog dheeraad ah la helo..

Haddaba wixii faahfaahin dheerd ah kala soo xiriiriir: Dawn Elizabeth Blalock, Madaxa warbaahinta guud ee xafiska isku-duwaha Arrimaha Bini'aadminnimada QM – Somalia, +254-734-210-102 or blalock@un.org

Fiiro Gaar ah oo ku wejahan tafaitirayaasha: Marka waxay ku taal ilaa qiyaastii 100 km koofurta-galbeed ee magaalda Mogadishu, waana goob muhiim u ah sahayda iyo xudunta hawlgalka QM. Waxaana imminka ku sugan Marka lix hay'adood oo Qaramada Midoobay ka tirsan, iyadoo ugu badnaan ay ka shaqeeyaan ilaa 50 qof. Hay'adda WFP, waxay raashinka kala soo degtaa Dekadda. Hay'adaha kale, sida UNICEF iyo WHO, ayaa waxay gacan ka gaystaan cisbitaallada iyo rugaha caafimaadka, iyadoo ku hawlan ololayaasha dhinaca tallaalka.

Hay'adda Cuntada iyo Beeraha (FAO), ayaa iyaduna waxay imminka ka shaqaysaa meel-marinta mashruuca hawlgalka lacagta naqdigaa ah ee loogu talo galay santuukha Dhexe ee Gurmada Deg-degta ah (CERF) ee hawlaha dayactirka kaabayaasha waraabka gobolka shabeelaha hoose. Xafiiska QM ee mashruuca adeegyada, ayaa isna wuxuu gacan ka gaystaa hawlgalka dhismaha nabadda. Waxaa kaloo jira hay'ado fara badan oo kale oo caalami ah iyo hay'ado aan dawli ahayn oo maxalli ah oo ka shaqeeya Marka.

Guud ahaan, xaaladda dhinaca bini'aadminnimada ah ee Soomaaliya, ayaa ka sii daraysa. Tirada dadka gurmada baahida deg-degta ah u baahan, ayaa lagu qiyaasayaa ilaa 3.2 million. Tani waa kororsiimo dhan ilaa 77 boqolkiiba ilaa bilowgii sannadkan 2008, taasoo u taagan qiyaas ahaan ilaa 43 boqolkiiba wadarta guud ee dadweynaha. Waxaana wadarta guud ee dhimashada shaqaalaha hay'adaha gargaarka ee Soomaaliya ilaa bishii January waxay gaarysaa ilaa 23, iyadoo ay weheliyaan 25 kale oo af-duub loo gaystay, welina waxaa gudaha dalka lagu haystaa 12 kale.

Springette, Off Lower Kabete Road, 1st left after Spring Valley Police Station, P.O. Box 28832, 00200, Nairobi, Kenya

Tel. (25420) 4183640, 4183642/3/4; Fax (25420) 4183641

Statement from the United Nations on the Incident outside Marka